

## SAHAYDA BADBAADADA DEGDEGA GURIGA

Qoys walbaa waa in uu haystaa sanduuqyo gaar ah ee sahayda deg dega.

Korontada, biyaha, gaadiidka, iyo qalabyada kale ee muhiimka ah waxay carqaladeyn kartaa dhoor maalmood ama waqti ka dheer meelaha qaarkood marka ay dhacaan dhul gariir balaaran ama cimilada degdega. Hay'adaha jawaabta degdega iyo isbitaalada way buuxsami karaan iyo ma suurto galeyso in ay ku siiyaan caawinta degdeg. Bixinta gargaarka ugu horeeyo iyo lahaanshada sahayda waxay badbaadineysaa nolol, waxay ka dhigeysaa nololsha mid aad u raaxo leh, iyo waxay kugu caawineysaa in aad ka soo kabsatid dhul gariirka xiga.


Diyaar ka dhigista sahayda degdega waxay yareyn kartaa saameynta dhul gariirka, duufaanta qaboobaha, ama arimaha kale ee degdega adiga iyo qoyskaaga.

Ku diyaarinta sahayda masiibooyinka goob ku haboon.

Ku haay meesha inta badan aad ku isticmaashay waqtigaaga, si markaas loo gaaro xitaa haddii dhismahaaga uu sixun u dhaawacmo.

Qalabyada waxay noqonayaan kuwa waxtar uleh arimo badan oo degdeg ah.

Sanduuqyada Sahaydaada degdega waa in ay ku jirtaa cunto, biyo, toosh, raadiyo la qaadi karo, batariyo, sanduuqa gargaarka koowaad, kaashka, daawooyin dheeraad ah, foori, dab damiye, fiiri liiska hoose.



Joogtey sanduuq balaaran ee gurigaaga ah, sanduuq yar oo gaarigaaga ah, sidoo kale sameey Sanduuqa To Go oo aad horay u qaadatid haddii ay tahay in aad si dhaqso ah uga tagtid guriga. Boorsooyinka dhabarka ama boorsooyinka kale ee yar way kuu wanaagsanyihiin Sanduuqaaga masiibada Lagu Aado si markaas aad u qaadatid haddii aad gurto.

Sanduuqa sahayda degdega ee qoyska

Sameey sahay sheeyada xiga ah si markaas ay raagto ugu yaraan 3 maalmood iyo fikrad ahaan 2 isbuuc:

- Biyo (ugu badnaan hal qeyb 4 litar maalintii qofkiiba)
  - Cuntada gasacadeysan iyo baakideysan
  - Karinta utensils, oo ay ku jiraan gasac gubaha gacanta ah
  - Daawo
  - Qalabka musqusha (saabuun, daawada ilkaha, waxyaabaha nadaafada)
  - Xafaayada iyo cuntada ilmaha, haddii loo baahanyahay
  - Cuntada xayawaanka iyo xanibaada xayawaanka
  - Raaxo leh, dhar kuleel oo ay ku jiraan soksaan dheeraad ah
  - Busto ama boorsooyinka jiiifka, iyo xitaa teendho
  - Koobiyada Dukumintiga muhiimka ah sida xeerarka caymiska
  - Raadiyo la qaadi karo ee badatriyo dheeraad ah wata (ama jaajar gacanta ah ee jaajareynta)
  - Tooshash deeraad ah ama ulaha nalka
  - Kiyaawe lagu wareejiyo gaaska iyo sahayda biyaha
  - Gacangashiga shaqada iyo ookiyaale difaac
  - Bacda weyn ee qashinka, iyo sida loogu adeego sida goglida, dalada roobka, iyo isticmaalayaasha kale
  - Sahayda karinta banaanka iyo taraq
- Isticmaal iyoo ku bedel sheeyo cusub sida biyaha, cuntada, daawooyinka iyo batariyada si ku saleysan sannad walba.

